



Somali

**Ganaaxa Daroogo Ku-wadida Gaari (Drug Driving Infringement) – Baaritaan siyaada ah oo laga qaadayo dheecaanka Afka**

Waxaa lagu siiyey ogeysiin ganaax oo daroogo gaari ku wadida (Ganaax). Ujeedada dukumintigaani waa in lagu sheego dheecaanka afkaaga laga qaaday in loo diri doono sheybaar la ansixiyey si baarid siyaad ah loo sameeyo, laguuna siiyo macluumaad ku saabsan sida ganaaxaaga loola dhaqmi doono, iyada oo ku xiran natiijada ka soo baxda baaritaanka sheybaarka.

Ka hor inta aan lagu siin ganaax, saamiga dheecaankaq afkaaga ayaa waxaa baaraya qalab lagu fahmi kara baaritaanka dheecaanka afka. Natiijada baarista ayaa muujisay in dheecaankaaga laga qaaday afkaaga ay ka muuqato daroogada sharci darada ah.

Fiktooriya gudaheeda Booliiska khibradooda qalabka baara dheecaankaq wuxuu soo saaraa waqtiga intiisa badan natiijoyin sax ah. Si loo ta'kiidiyo in natiijadu ahayd sax kayskaaga, Booliiska Fiktooriya waxay u diri doonaan dheecaankaga afka sheybaar la aqoonsan yahay si loo sameeyo baaritaan dheerad ah.

Jadwalka soo socda ayaa sheegi doona sida ganaaxaaga loola tacaali doono, **iyada oo ku xiran baaritaanada sheybaarka.**

<p>Haddii baarista sheybaarku <b>ta'kiidiso</b> in candhuufadii laga qaaday afkaaga ka koobnayd daroogo sharci daro ah, ganaaxu wuxuu ahaanaya mid la meelmarin doono, waajibaadkaaga iyo xalalka (sida xuquuqdaada lagu diidmada ganaaxa) waxaa lagu muujiyey ganaaxa dushiisa.</p> <p>Haddii taasi dhacdo, lagu sheegi mayo natiijada baaritaanka sheybaarka, haddii aadan diidin ganaaxa.</p>
<p>Haddii natiijada sheybaarka aanay ta'kiidin jiritaanka daroogo sharci dara ah oo dheecaanka afkaaga, ganaaxa waa lala noqonayaa, wax ciqaab ah oo ganaax la xiriirtaana ma jiri doonto.</p> <p>Haddii taasi dhacdo, Booliiska Fiktooriya ayaa kuugu sheegi doona qoraal iyaga oo ku soo diraya cinwaanka aad siisay booliiska Fiktooriya. Haddii aad bixisay ganaaxa, lacagta aad bixinayso waa lagu soo celinayaa.</p>
<p>Haddii booliisku <b>aanu hellin natiijada</b> sheybaarka 28 berri gudahood maalinta ganaaxa ka dib, ganaaxa waa lala noqonayaa.</p> <p>Haddii taasi dhacdo, Booliiska Fiktooriya ayaa kuugu sheegi doona qoraal cinwaankaad siisay Booliiska Fiktooriya. Haddii aad bixisay ganaaxa, lacagta aad bixisay waa lagu soo celinayaa.</p> <p>Saamiga afkaaga laga qaaday ayaa <b>waxaa weli baari doona sheybaar la aqoonsan yahay.</b></p> <p>Haddii natiijada baaristu <b>ta'kiidiso</b> in saamiga afkaaga laga qaaday ka koobnaa daroogo sharci daro ah, waxaa lagu siin doonaa ogeysiis ganaax oo <b>cusub</b> gafka lagu ugu edeeyey.</p> <p>Haddii baarista sheybaarku <b>aanay ta'kiidin</b> jiritaanka daroogo sharci daro ah oo saamiga dheecaanka afka, lama qaadi doono wax ficil ah.</p>

Waad diidi kartaa haddii ganaaxa **28 berri gudahood** maalinta Ganaaxa ka dib.

Haddii aad **diido** ganaaxa, sheybaarkuna ta'kiidiyo natiijada in saamiga lagaa qaaday ka koobnaa daroogo sharci daro ah, Booliiska Fiktooriya wuxuu raadin doonaa in arrintaada Maxkamad la geeyo si ay go'aan uga gaarto **iyada ku salaysan natiijada baaritaanka sheybaarka.**

Haddii **aadan diidin ganaaxa**, mudada diidmada dhexdeedana natiijada sheybaarku ta'kiidiso in saamiga lagaa qaaday muujiyey daroogada sharci darada ah, waxaad si toos ah u heli doontaa go'aanka dembiga, iyada oo aan ku xirnayn in aad bixisay ganaaxa iyo in kale.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan habka ganaaxa waxaa laga heli karaa websaytka ganaaxa Fiktooriya oo ah <https://online.fines.vic.gov.au/> ama adiga oo wacaya "Fines Victoria oo ah (03) 9200 811", inta u dhexaysa 8 subaxii iyo 6.00 maqribkii, Isniinta ilaa Jimcaha. Wacayaasha ka socda Qaybaha Fiktooriya waxay wici karaan Ganaaxa Fiktooriya (Fines Victoria) oo ah 1300 369 819 qiimuhuna waa kan halkay joogaan.